
Ururka Midnimo

# QODOBKA 1aad – Xarunta Ururka

Ururku Wuxuu xaruun ku leeyahay dowlad goboleedyada Puntland, wuxuuna xafiisyo ku yeelan doonaan dalka intiisa kale.

**QODOBKA 2aad – Calanka Ururka**

Calanka ururka waa cadaan dhexda ku leh falaaro-qoraxeed, Caddaanku wuxuu u taagan yahey Nabad (peace). Fallaaraha qoraxduna waxey u taagan Yihiin Daahfurnaan (transparency)



**QODOBKA 3aad – Astaanta Ururka**

Astaanta Ururka waa garaan buluug ah oo Qooley cad oo gacan ka kor duulaya. Garaanta buluuga ahi waxey u taagan tahey Cirka, galeyrkuna nabad, gacantuna amaano. (qoraalka)

**QODOBKA 4aad - Xubinimada Ururka**

Xubinimada ururku waa mid ku salaysan shakhsi, umana gudbi karto cid kale, lamana kala dhaxli karo. Xubinimadu waxay u furan tahay qof kasta oo Soomaali ah oo buuxiya shuruudaha ku qoran qodobka shanaad.

**QODOBKA 5aad** - **Shuruudaha Xubinimada** Shuruudaha xubinnimadu waa:

1- Inuu yahay Soomaali aaminsan Ku dhaqanka Shareecada Islaamka, una hogaansan yahey dastuurka iyo shurucda dalka u yaala.
2- In aan da'diisu ka yarayn 18 sano
3. Inuu maskax ahaan fayow yahay
4. Awood buuxda u leeyahay gudashada xilka xubinimo.
5. Oggol yahay xeerarka iyo barnaamijka siyaasadeed ee Ururka.
6. Lahayn fal-danbiyeed maxkamadi hore ku xukuntay.
7. Bixiyaa dhigaalka Ururka, Shan doolar (10 US$) bil kasta.
8. In uusan Xubin ka ahayn Urur kale oo siyaasadeed.

**QODOBKA 6aad** - **Xuquuqda xubinimada**

Waxaa xeerka ururku Xubnaha u damaanad-qaadayaa xuquuqaha hoos ku xusan:

Ururka Midnimo

1. In la dooran karo, waxna dooran karo, loona magacaabi karo xilalka uruka.
2. Ka qayb qaadashada hawlaha Ururka sida doodaha arrimaha Ururka, talo soojeedinta iyo wax qabadka Ururka.
3. In ay xubintu si xor ah u soo bandhigi karto afkaarteeda, soona jeedin karto talooyin ama dhaliilo la xiriira hawlaha ururka.
4. In xubintu si xor ah uga bixi karto Ururka markuu istaqaalada soo gudbiyo hase yeeshee aan wax magdhaw ah ururka xaq ugu laheen.
5. In xubintu xaq u leedahay inay dacwad kusoo oogto xubint kasta oo jabisa xeerarka ururka.
6. In Xubintu heshaa aqoonsi xubinimo.

**QODOBKA 7aad - Waajibaadka xubnaha**

Xubin kasta waxaa waajib ku ah:

1. U hogaansanaanta xeerka Ururka, go'aanada ka soobaxa masuuliyiinta, iyadoo tixgelin la siinayo habka kala sareynta ururka.
2. Inay barnaamij siyaasadeedka iyo hawlaha Ururka u fuliso si daacadnimo ah.
3. In ay ka qayb qaadato hirgelinta barnaamijka Ururka, adeegga, horumarinta bulshadiisa iyo abaabulka umadiisa.
4. In xubintu ilaaliso sirta, hantida iyo sumcada Ururka.
5. Inay umadda ku wacyigeliso kuna abuurto ama ku abaabusho dareen wadaninimo.
6. Inay xogogaal u noqoto xaalada siyaasadeed iyo dhaqaalee ee wadanka.
7. Inay ka hortagto wixii iska horimaad bulsho abuuraya, sida kala sooc, eex iyo qaraabokiil.
8. Inay kusoo bandhigto wixii tabasho xisbiga gudihiisa ah si qoraal ama oraah ah, laakiin aysan u banaanayn inay dibedda u saarto.

**QODOBKA 8aaD - Luminta Xubinimada**

Xubinimada ururka waxaa lagu lumin karaa arrimahaan soo socda:

1. In xubintu ka baxdo Ururka sababtana qoraal ahaan ku soo gudbisa.
2. Hadii Xubintu geeriyooto.
3. Hadii xubintu ka hor timaato xeerka iyo barnaamij ka Ururka, waxaana arrintiisa/teeda baaris ku sameynaya guddiga anshax, waxayna u gudbinayaan arrintiisa/teeda guddiga sare ee laanta si go'aan kama dambays ah uga ka gaaraan.
4. Hadii xubintu xilkeeda gudan weydo, saddex jeerna laantiisu/teedu diginina siiso.


**QODOBKA 9aad - Dhismaha Ururka**

Dhismaha Ururku wuxuu ka koobanyahay:

1. Aasaasayaasha
2. Shirweynaha
3. Golaha Dhexe
4. Gudiga fulinta
5. Gudiga gobollada
6. Gudidga degmooyinka, laamaha dibada iyo gudiga tuulooyinka/xaafadaha

# Ururka Midnimo

**Qaab Dhismeedka Ururka (Sawir)**




**Asaasayaasha:**

1. Shirweynaha ururka,
2. Guddomiyaha iyo Ku xigeenada (2)
3. Xoghayaha Guud iyo ku xigeenada(2)
4. Golaha dhexe (162)
5. Guddiga fulinta (36)
6. Guddoomiyayaasha Gobollada (18)

7. Laamaha Jaaliyadaha Dibada (25), Gudiyada Degmooyinka (11), Guddiyada Xaafada iyo tuulooyinka.

**QODOBKA 10aad - Asaasayaasha**

1. Waa xubnaha asaasay Ururka
2. Waxay matalayaan dhammaan Guddoomiyayaasha Gobollada ; Shirweynaha; Guddomiyaha iyo K/xigeenadiisa (2), Golaha dhexe (162), Xoghayaha guud iyo Ku xigeenkiisa (2), Gudiga fulinta (36), Guddiyada Degmooyinka (11), Guddiyada Xaafada iyo tuulooyinka iyo laamaha dibadda
3. Xubnaha asaasayaasha ah tiradoodu waa 41+ 10 (dumar) xubnood oo matalaya Dhammaan gobolada.

**QODOBKA 11aad - Awoodda iyo Waajibaadka Asaasayaasha ururka**

1. Si kumeel gaar ah waxay u dooranayaan guddoomiyaha, guddoomiye ku xikeenka kowaad iyo guddoomiye kuxigeen labaad
2. Waxey si ku meel gaar ah u dooranayaan Xogahya guud, iyo labadiisa ku xigeen
3. Waxay si kumeel gaar ah u dooranayaan guddigga fulinta kumeel gaar ah.
4. Waxay muddo lixdan (90) maalmood gudahood ah ku diyaarinayaan shirweyne guud oo tiradiisu dhantahay 241 xubnood, kuwaasoo ka kala imanaya dhammaan gobollada iyo jaaliyada si uu u qabsoomo shirweynaha ururka.
5. Aasasayaashu waxay leeyihiin awood sharafeed shirweynaha kowaad ka dib, awoodaas oo ku kooban marka loo baahdo badbaadinta ururka, waana marjaca Kama dambaysta ah.

**QODOBKA 12aad - Shirwaynaha**

1. Shirwaynaha ururku waa hay'ada ugu saraysa ururka sharci ahaan xagga awooda maamulka, waxaana shirwaynuhu ka kooban yahay ergooyinkan:

   a. Ergooyin ka socda gobollada, degmooyinka iyo laamaha dibadda.
   b. Xubnaha golaha dhexe
   c. Xubnaha loo doortay golayaasha qaranka iyo deegaanka.
   d. Tirada ergooyinka shirwaynuhu waa Laba boqol iyo afartan iyo kow (241).
   e. Shirweynaha kowaad wuu ka beddelan yahay shirweynayaasha ka dambeeya xagga tirada, iyo mas'uuliyadaha.

2. Shirwaynaha ururka waxaa la qabanayaa afartii sanaba hal mar, iyadoo laga soo bilaabayo maalintii uu xirmay shirwaynihii u dambeeyay, waxaana soo jeedinaya maalinta la qabanayo iyo goobta lagu qabanayo guddiga fulinta, wuxuuse ku ansaxayaa cod haldheeriya oo golaha dhexe ah, sadex bilood ka hor inta ayna dhamaan muddada' afarta sano ah. Waxaana lixdan maalmood ka hor mudada loo cayimay baahinaya/shaacin guddiga fulinta.
3. Hadii shirwaynuhu uu ku qabsoomi Kari waayo mudadaas loo cayimay, guddiga fulintu waxay soo jeedinayaan in dib loo dhigo mudo aan ka badnayn (90) sagaashan maalmood oo ka bilaabanaysa maalintii loo cayimay ee uu qabsoomi Kari waayey. Laakiin baahinta dib u dhiggaasi waa in la gudo galo labo bilood ka hor intaanay dhamaan mudada loo cayimay qabsoomidda shirweynaha iyada oo guddiga fulintu ay ku ogolaanayso cod haldheeriya, waxayna golaha dhexe go'aankaas dib u dhigga ah ku ansixinaayan cod 2/3. Guddiga fulinta

waxay dib u baahinayaan go'aankaas mudo Shan iyo afartan maalmood ka hor maalinta loo cayimay qabashada shirka.

4. Hadii ay timaado sabab lagama maarmaan ka dhigaysa in la qabto shiraan caadi ahayn, guddiga fulintu waxuu kusoo jeedin karaa qabashada shirweyne aan caadi ahayn cod haldheeri ah, ka dib haddii golaha dhexe ku ansixiyo cod 2/3 iyagoo cayimaaya mudada la qabanayo shirwaynaha iyo goorta lagu qabanayo. Dabadeed guddiga fulinta waxay ku baahinayaan go'aankaas muddo labaaatan maalmood gudahood ah, isaga oo markasta shirwaynuhu ku qabsoomayo 2/3 tirada ergooyinka.

**QODOBKA 13aad - Awooda iyo waajibaadka shirwaynaha**

1. Doorashada gudoomiyaha, gudoomiye xigeenka koowaad,kan labaad, xoghayaha guud iyo labada ku xigeenka xoghayaha guud afartii sanaba mar.
2. Doorashada xubnaha golaha dhexe.
3. Ansixinta xeerka iyo barnaamijka Ururka.
4. Ka doodaya warbixinada loo soo gudbiyo iyo ajandayaasha loo soo diyaariyo.
6. Qiimaynta hawl-qabadkii guddiga fulinta mudadii uu xilka hayey, wixii qabsoomay/qabsoomi waayey iyo sababaha.

**QODOBKA 14aad - Golaha dhexe**

Golaha dhexe wuxuu ka kooban yahay boqol iyo lixdan-labo (162) xubnood waana hay'adda ugu saraysa Uruka inta u dhaxaysa labada shirwayne.

Xubnaha golaha dhexe waa in ay leeyihiin tilmaamaha soo socda:

2. Miyirkiisa/miyirkeeda taam yahay
3. Maxkamadi dambi hore ugu xukumin.
4. Deggan yahay gobolka uu matalaayo.
5. Da'diisu ka yarayn 25 sano.
6. Ku sifoobo akhlaaq iyo dabeecad-wanaag
7. Leeyahay aqoonta dugsiga sare

**QODOBKA 15aad - Waajibaad ka Golaha dhexe**

Waajibaadka golaha dhexe waa sidan:

1. Doorashada xoghayaha golaha dhexe iyo gudi-hoosaadyo.
2. Doorashada xubnaha guddiga fulinta.
3. Doorashada xubnaha guddiga hanti-dhawrka (3) - u madax bannaan hawlahooda, warbixintoodana toos ugu gudbin karaan golaha dhexe.
4. Ansixinta miisaaniyada Ururka, hogaaminta siyaasada iyo barnaamijka Ururka
5. Qaymaynta wax-qabadka gudiga fulinta.
6. Kormeerka iyo hubinta fulinta go'aamadii horey loo ansixiyay iyo habka barnaamijka Ururku u fuley.

7. Xallinta khilaafaadka ku yimaada mas'uuliyiinta sare ee Ururka.
8. Ansixinta heshiisyada dhexmara Ururka iyo ururada kale oo ku saabsan iskaashi iyo wax-wadaqabsi
9. Haddii geeri ku timaaddo xubin golaha dhexe ka tirsan, waxay soo magacaabayaan xubinta lagu badalayo.

**QODOBKA 16aad - Fadhiyada Golaha dhexe**

1. Fadhiga golaha dhexe ee caadiga ah waxa la qabanayaa lixdii biloodba mar, laga bilaabo maalinti uu xirmay fadhigii ugu danbeeyay. Wakhtiga fadhiga waxaa cayimaya guddiga fulinta.
2. Haddii ay timaado duruuf ka dhigta lagama maarmaan in la qabto fadhi aan caadi ahayn waxa soo jeedinaaya guddiga fulinta oo ku oggolaanaya cod hal dheeriya. Waxaana fadhiga lagu qabanayaa mudo aan ka badnayn labaatan (20) maalmood.

**QODOBKA 17aad - Guddiga Fulinta**

Guddiga Fulintu waa hay'ada ugu saraysa maamulka iyo fulinta hawlaha Ururka, waxay ka kooban tahay sondon iyo lix (36), la dooranayana afartii sanaba mar.

**QODOBKA 18aad - Waajibaadka Guddiga fulinta**

1. Hirgalinta & maamulka barnaamij-siyaasadeedka iyo xeerka Ururka.
2. Fulinta go'aamada lagu ansixiyay shirwaynaha iyo fadhiyada Golaha dhexe.
3. Diyaarinta miisaaniyada Ururka, ajandayaasha la hordhigayo fadhiyada Golaha dhexe iyo warbixinada la xariirta waxqabadka Guddiga fulinta.
4. Ansixinta xilalka guddiyada gobollada, degmooyinka, laamaha, xoghayayaasha guddiyada fulinta iyo hawl-wadeenada.
5. Abaabulka iyo wacyi galinta dadweynaha iyo hirgalinta hadafka siyaasadeed ee Ururka.
6. Horumarinta adeegyada bulshada iyada oo lala kaashanayo kaalmo dibadeed iyo hay'adaha samafalka, iyaga oo dhawraya danaha guud, islamarkaana hay'adahaas u fududaynaya helitaanka khubaro waddani ah ama caalami ah.
7. Inay howsha u gutaan si daacadnimo iyo isxilqaan ah, ilaaliyaanna wada shaqaynta iyo xiriirka xubnaha kale iyo bulshadaba.
8. Fadhiyada caadiga ah ee guddiga fulinta waxay noqonayaan bishiiba mar, waxaana shirguddoon ka noqonaaya guddoomiyaha Ururka, hadii uu maqanyahayna gudoomiye ku xigeenka koowaad, hadii uu maqanyahayna guddoomiye ku xigeenka labaad.

9. Waxay ansixinayaan xubnaha xisbiga ka galaya golayaasha qaranka iyagoo la tashanaaya xarumaha gobollada, degmooyinka iyo laamaha, raacayana qodobka 27 aad.

**QODOBKA 19aad - Xilalka xubnaha Guddiga fulinta**

1. Guddoomiyaha guddiga fulinta ahna guddoomiyaha Ururka
2. Gudoomiye ku-xigeenada (guddomiye kuxigeenka koowaad Kan labaad)

3. Xoghayaha guud.
4. Ku xigeenada xoghayaha guud ( Xooghaye kawad iyo Labad)
5. Xoghayaha arimaha gudaha, xiriirka gobolada iyo degmooyinka.
6. Xoghayaha iskaashiga dibedda, xiriirka hay'adaha, iyo siyaasadda.
7. Xoghayaha arrimaha bulshada.
8. Xoghayaha horumarinta haweenka iyo arrimaha qoyska.
9. Xoghayaha warfaafinta, abaabulka, wacyigelinta iyo saxaafadda.
10. Xoghayaha maaliyadda, maamulka iyo qorshaynta.
11. Xoghayaha ganacsiga, warshadaha iyo khayraadka dabiiciga ah.
12. Xoghayaha maaraynta masiibooyinka iyo ilaalinta xuquuqda Aadamiga.
13. Xoghayaha beeraha, kaluumaysiga iyo xoolaha.
14. Xoghayaha difaaca iyo nabadgalyada.
15. Xoghayaha diinta, awqaafta, cadaaladda iyo arimaha sharciyada.
16. Xoghayaha dhallinyarada iyo ciyaaraha.
17. Xoghayaha Golaha dhexe.

**QODOBKA 20aad - Hawlaha guddoomiyaha iyo musharaxnimadooda**

1. Guddoomiyuhu waa madaxa Ururka, waxuuna guddoominayaa shirwaynaha iyo fadhiyada golaha dhexe waana guddoomiyaha guddiga fulinta mudadda uu xilka hayaana waa afar sano.
2. Maamulka hawlmaalmeedka Ururka, wuxuu saxiixaa qoraalada rasmiga ah.
3. Wuxuu u soo jeediyaa shirwaynaha iyo fadhiyada golaha dhexe warbixino, talabixino ku saabsan siyaasadda iyo qorshaha hawlaha Ururka.
4. Maamulka xeerka iyo barnaamijka siyaasadda.
5. Wuxuu Ururka ku matalaa shirarka gudaha iyo dibadda isaga oo aan ku xadgudbayn xeerka iyo barnaamijka Ururka.
6. Saxiixaa heshiisyada dhexmara Ururka iyo xisbiyada kale ka dib markay guddiga fulintu ku ogolaato cod hal dheeriya, dabadeed waxaa la horkeenayaa fadhiga ugu horeeya ee golaha dhexe.
7. Magacaabayaa guddiga qabanqaabada shirweynaha waxaana ogolaanaya guddiga fulinta.
8. Hadii ay guddoomiyaha ku timaado geeri, waxaa jagadiisa buuxinaya guddoomiye ku xigeenka koowaad, inta shirweyne aan caadi ahayn qabsoomayo muddo lix bilood ah wixii aan ka ahayn sannadka ugu danbeeya.

**QODOBKA 21aad - Guddoomiye kuxigeenka koowaad iyo Kan labaad:**

(a) 1- Labada guddoomiye ku xigeen waa ku xigeenka koowaad iyo ka labaad hadii uu joogo gudoomiyuhu iyo hadii uu maqanyahayba.

2. Labada gudoomiye ku-xigeen waxay qabanayaan hawl kasta oo uu u igmado gudoomiyuhu waxaanay ka caawinayaan socodsiinta hawlaha Ururka.

3. Marka uu maqanyahay gudoomiyuhu waxa uu hawshiisa u sii igmanayaa gudoomiye ku-xigeenka koowaad si uu u fuliyo hawlihii looga baahnaa oo dhan, hadii isaguna uu maqan yahay, waxa hawsha qabanaya guddomiye ku-xigeenka labaad.

(b) **Shuruudaha musharaxnimada gudoomiyaha:**

1. Waa in aqoontiisu/teeda gaarsiisan tahay heer jaamacadeed.
2. Da'diisa/deeda waa inaysan ka yareeyn sodon iyo Shan sano (35).
3. Waa inuu/Inay sanadkii ugu dambeysey uu dalka ku sugnaa/sugnayd.
4. Waa inuusan/inaysan maxkamad ku xukumin wax danbi ah shanti sanoo u dambeysey.
5. Waa inuu leeyahay/leedahay waayo aragnimo siyaasaded.
6. Waa inuu yahay qof bulshadada dhexdeeda sumcad ku leh.
7. Mudada xilka guddoomiyaha iyo ku xigeenadiisa waa afar sano (4).

**© Shuruudaha musharaxnimada Gudoomiye Ku xigeenada**:

1. Waa in aqoontiisu/teeda gaarsiisan tahay heer jaamacadeed.
2. Da'diisa/deeda waa inaysan ka yareeyn sodon iyo Shansano (35).
3. Waa inuu halkii sano ee u dambeysey uu dalka ku sugnaa/sugnayd.
4. Waa inaysan maxkamad ku xukumin wax danbi ah shanti sanoo u dambeysey.
5. Waa inuu leeyahay/leedahay waayo aragnimo siyaasaded.
6. Waa inuu yahay qof bulshada dhexdeeda sumcad ku leh.
7. Muddada xilka guddoomiyaha iyo ku xigeenadiisa waa afar (4) sano.

(c) **Luminta xubinimada gudoomiyaha iyo ku xigeenadiisa**:

1. Haddii uu geeriyoodo/yeeto.
2. Haddii uu soo qorto warqad uu ku codsanayo/codsaneyso inuu xilka isaga tago.
3. Haddii ay timaado xaalad caafimaad darro ah oo keeneysa inuu gudan waayo xilkiisa/keeda.
4. Haddii ay cadaato inuu/inay jebiyey/jebisey shuruucda iyo qawaaniinta Ururka.
5. Golaha dhexe ayaa xilka ka qaadi kara, markay u codeeyaan xil ka qaadista 2/3 oo xubnaha golaha dhexe ah.
6. Eedeyntaas waxaa soo gudbin kara guddiga fulinta iyo golaha dhexe oo kaliya.

**QODOBKA 22aad - Xoghayaha guud iyo labada xigeen iyo musharaxnimadooda**

(a)

1. Xoghayaha guud waxa uu mas'uul ka yahay socodsiinta maamulka xisbiga guud ahaan Waxa uu diyaarinayaa qoraalada warbixinada miisaaniyada, ajandayaasha lagaga doodaayo fadhiyada Guddiga fulinta, Golaha dhexe iyo shirwaynaha.
2. Xoghayaha guud waxa uu masuul ka yahay daba-galka fulinta go'aamada la ansixiyay iyo hirgalinta barnaamijyada siyaasadda, isaga oo la kaashanaya xoghayaha ka ma'suulka ah hawshaas.

3. Xoghayaha guud waxa uu maamulayaa shaqaalaha xisaabaadka isla markaana waxa uu habaynayaa oo uu kaydinayaa dukumentiga Ururka, waxaana uu diiwaangelinayaa oo uu ilaalinayaa hantida Ururka.

4. Xoghayaha guud waxa uu madax u yahay xoghayayaasha kale ee guddiga fulinta waxaana uu ku kormeerayaa habsami u socodka hawlaha ay ka masuul ka yihiin.

5. Xoghayaha guud waxa uu qabanayaa hawshii kale ee uu u xilsaaro gudoomiyuhu.

6. Hadii ay xoghayaha guud geeri ku timaado waxaa xilka sii haynaya ku-xigeenkiisa muddo lix bilood ah inta shirweyne aan caadi ahayn la qabanayo, haddii muddadu aanay ahayn sannadka ugu dambeeya.

**(b) Shuruudaha musharaxnimada Xoghayaha guud**

1. Waa inuu leeyahay aqoon heer jaamacadeed ah.
2. Da'diisuna ka yareeyn soddon (30) sano.
3. Labadii sano uu danbbeysey dalka ku sugnaa.
4. Maxkamadi ku xu kumin wax danbi ah shanti sanoo u danbeyysey.
5. Leeyahay waayo aragnimo siyaasaded.
6. Bulshada dhexdeeda sumcad ku leeyahay.

**(c) Shuruudaha musharaxnimada Ku xigeenada Xoghayaha guud.**

1. Waa inuu leeyahay aqoon heer jaamacadeed ah.
2. Da'diisuna ka yareeyn soddon (20) sano.
3. Labadii sano uu danbbeysey dalka ku sugnaa.
4. Maxkamadi ku xu kumin wax danbi ah shanti sanoo u danbeysey.
5. Leeyahay waayo aragnimo siyaasaded.
6. Bulshada dhexdeeda sumcad ku leeyahay.

**(d) Luminta xubin-nimada xoghayaha guud iyo ku xigeenkiisa**

1. Haddii uu geeriyoodo/yeeto.
2. Xil gudasho la'aan xaalad caafimaad awgeed.
3. Haddii u xilka iska casilo.
4. Ku caddaato inuusan u hoggaansanayn shuruucda iyo qawaaniinta Ururka.
5. Golaha dhexe ayaa xil ka qaadista wood u leh, kadib codayn 2/3 oo xubnaha golaha dhexe ah.
6. Eedeynta waxaa soo gudbin Kara guddiga fulinta iyo golaha dhexe oo kaliya.

**QODOBKA 23aad - Guddiga Hantidhawrka**

1. Gudiga hanti dhawrku waa guddi madax bannaan, ka kooban saddex xubnood (3), ka imaanaya Golaha dhexe.
2. Waxay toos u baari karaan dhamaan xafiisyada Ururka iyo hantida Ururka, waxayna warbixin toos ugu gudbin karaan Golaha dhexe.

3. Waxay shaqada ka joojin karaan qof kasta oo hantida Ururka ku takrifala, iyaga oo la socodsiinaya madaxda ka sarraysa haddii ay u caddaato in lagu takrifalay hantida Ururka.

**QODOBKA 24aad**

**Qaybaha xisbiga**

1. Gobol kasta wuxuu yeelanayaa guddi joogta ah oo ka kooban Shan iyo toban xubnood (15), guddigaas waxuu yeelanayaa gudoomiye iyo gudoomiye kuxigeen, xoghaye iyo xubnaha kale oo ka mid noqonaya hawlwadeenadda xisbiga.
2. Degmo kastaana waxay yeelanaysaa guddi joogto ah oo ka kooban  kow iyoTodobo (11) xubnood oo iska dhex doorta gudoomiye, gudoomiye ku xigeen iyo xoghaye iyo xubnaha kale oo noqonaya howl wadeenada xisbiga ee degmadda.
3. Laamaha dibadda waxaa loo aqoonsanayaa heer degmo ama laan iyadoo loo eegayo baaxadda jaaliyada ee deggan meeshaas, waxaana lagu kala saarayaa taageerayaasha xisbiga ee bixiya qaaraanka xisbiga.
4. Tuulooyinka iyo xaafadaha waxay yeelanayaan guddi joogto ah oo ka kooban Shan (5) xubnood waxayna iska dhex dooranayaan guddoomiye, guddoomiye ku xigeen iyo xoghaye.

**QODOBKA 25aad - Hawlaha guddiyada Ururka**

1. Fulinta barnaamijka siyaasada Ururka.
2. Diiwaan galinta xubnaha ka mid noqonaaya Ururka.
3. Abaabulka iyo wacyigelinta dadweynaha.
4. Xiriirka iyo wadatashiga xafiisyada Ururka ee tuulooyinka, laamaha dibadda, degmooyinka, goboladda iyo xarunta guud, iyada oo taladu min tuulooyinka ilaa xarunta guud ee Ururka ay ku dhisan tahay hab dimuqraadi ah.

**QODOBKA 26aad - Guddiga doorashooyinka**

Guddiga doorashooyinka waxa ay masuul ka yihiin maamulka doorashada xubnaha fulinta & ku dhawaaqista natiijada doorashooyinka.
Gudiga doorashadu waxaa uu ka kooban yahay 9 xubnood oo matalaya gobolada. waxay iska dhex doorayaan gudoomiye, guddomiye ku-xigeen, labo kormeere, afar qof oo codadka tiriya, iyo xoghayn.

Habka doorashada iyo cod tirinta - musharixiintu waxay codsigooda/CV-gooda, labo sawir iyo lacagta diiwan galinta u soo gudbinayaan guddiga doorashada afar (4) maalin ka hor maalinta doorashada. Murashaxu waxaa uu soo jeedinayaa khudbad uu ku faahfaahinayo awoodda uu u leeyahay maamulka xilka uu u sharaxan yahay, iyo qorshe hawleedkiisa.

Shirweynaha kowaad ee ururka murashaxiinta laguma xirayo shuruudo lacageed, balse laga bilaabo shirweynaha labaad murashaxiinta waxaa laga qaadi doonaa lacagta musharaxnimada, taasoo ay soo jaangoyn doonaan guddiga doorashada.

# Ururka Midnimo

Lacagta laga qaado murashaxiinta waxay si toos ah ugu dhici doontaa koontada  Ururka. Musharaxana waa inuu keenaa warqad caddeyn ah oo muujineysa inuu lacagta ku shubey koonta Ururka.
Guddiga doorashada ayaa u xilsaaran hubinta bixinta lacagta, ugu horayna waxaa la dooranayaa:
1. Gudoomiyaha
2. Ku xigeenada
3. Xoghayaha
4. K uxigeenka xoghayaha.
5. Golaha dhexe.

Doorashadu waxaa ay u dhacaysaa hab gacan taag ah. Doorashadu waxay u dhacaysa tartan xor ah oo xalaal ah waxaana lagu kala baxayaa cod hal dheeri ah.

**QODOBKA 27aad - Qaabka iyo shuruudaha soo xulista xubnaha u tartamaya xilka MADAXWEYNAHA IYO MADAXWEYNE KU XIGEENKA.**

1. Muwaadin kasta oo ka tirsan ururka waa u furan tahay in uu u tartamo madaxweyne ama madaxweyne Ku-Xigeen haddii uu buuxiyo shuruudaha xilka oo ah:

   A. Inuu yahay muwaadin, Muslim ah, ku dhaqmaa diinta Islaamka, miyirkiisu dhanyahay, da'diisuna aanay ka yarayn afartan (40) sano, qabin xaas ajnabi ah inta uu xilkahayana guursan Karin.
   B. Inuu leeyahay tacliin sare, waayo aragnimo hogaamineed, aqoon la xiriirta dhaqanka iyo hiddaha Soomaaliyeed, dalkana ku sugnaa halkii sano ee ugu dambaysay.
   C. Inaan xuquuqdiisa muwaadininimo go'aan maxkamadeed lagu hakin shanti sano ee ugu dambeysey.
   D. Inuusan hore u gelin khiyaamo qaran ama ku xad gudbin xuquuqda bani'aadamka.

2. Musharraxiinta jagada Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenku waa in ay yihiin xubno firfricoon, Ururka sumcad ku dhex leh, kuna baaqan dhaqaalahii Ururka.

3. Musharaxiintu waa in ay dalabkooda musharaxnimo u soo gudbiyaan Golaha Dhexe mudada loo qabto gudaheed.

4. Shirweynaha ayaa dooran doona musharaxiinta u taagan xilka Madaweyne/ Ku-xigeenka matalaya Ururka.

5. Qofkasta oo xil u haya ururka oo raba inuu u tartamo xilka madaxweyne ama madaxweyne ku-xigeenka, waa inuu ka tanaasulaa xilka uu markaas u hayo ururka.

# Ururka Midnimo

**QODOBKA 28aad: Wax ka bedelka ama ku gordhinta xeerka/dastuurka**

**Wax ka bedelida ama ku gordhinta xeerka ururk – waxaa wax ologa bedieli ama lagu gordin karaa habraacaan hoose:**

1. Golaha fulinta ayaa soo jeediyaan qodobka/firqadda wax laga bedelayo ama lagu gordinayo, kuna ansaxiyaan cod ah 2/3 (saddex-meelood, laba-meelood), una gudbinaya Golaha Dhexe.
2. Golaha Dhexe ayaan iyaguna cod 2/3 ku ansaxinya isbedelkii Golaha Funlintu soo ansaxisey.
3. Shirwynaha ururka ayaa cod hal-dheeri ah ku ansaxineysa shirweynaha ugu horeeya si isbedlakaasu uu
4.
5.
6. dhaqan-gal u noqdo.

**Dhammaad**

**Magacyada Saxiixayaasha iyo Xiriiryaasha Ururka Gobeysane:**

**1.**

**2.**

**3.**

**4.**

**5.**